Y-STOP

# KAADHKA BAADHIDDA

HELPLINE:
020 7324 2989

## IS – DEJI

Haddad degantahay, saamayan baad ku yeelan kartaa dhakhso u soo afjari – kartaa marka loo eego adigoon dagaalansan oo isla – weyn.

Haddad cadho dareentid, waad is – deginkartaa, si weyn uga neefso sanka iyo afka. Is deji, is xakamee.

## HA LIBIQSAN

Eegmad sarkaala o aadan ka libiqsan waxay ku dareen siineysaa inaad la simantahay, tihiinna dad wada hadlaya ee aand ahayn dambiile. Markaad edboon-tahay hoos bay isha kaaga rogayaan kuna adkaaneysaa inay kuu caga – jugleeyaan. Iskuday inaan cadho ama cabsi kaa roonaan.

## SU'AALO WEYDII

Arrinta u arrag mid ah sheekayasi ee aan ahyn isku – dhac (is-waajilad). Marka saarkaalka boliisku ku waydiiyo su'aalo macquul ah uga jawaab adiguna dib su'aalo u waydii. Maaha inaad siiso wixii gaar qof ahaan kuu ah, laakin boolisku waxay doonayaan inay ku xisaabtamaan wax-kastay ooy qabanayaan.

Sarkaal weydii **4 su'aalood** (3 maxay) + halkee:

- Maxaa ii joojineysaan – waa maxay sabtu – waa maxay awooda sharci ee ay adegsanayaan.
- Maxaa baadheysaan – walxa (Shyga) aad baadheysaan.
- Yaa tihiin – kaadhka agoonsiga sarkaal; haddanu labis sidan, fiiri astaanta ama kaardh – lambarka.
- Xagee ka socotaan: saldhiga ay ka tirsanyihiin.

Waa muhiim **inaad weydiiso xabsiga lagugu haynayo, iyo inaad iska tegi kartid.**

Su'aal kasta ooy ku waydiiyaan, waa weydiin-kartaa mideedoo kale. Labadaa qudob xusuusnow.

## RASIIDH

Kani waa margaaga rasmiga ah. Haddii lagaa siiyo xaashi qoraala'ah, hubi in qaybhoo dhami buuxaan ayna sax yihiin; hadduu saarkaalu aaladda – iligtroonig ah wax ku duubayo waxad heleysaa kaadh leh tix – raac lambar oo aad ku dalbanaysid rasiidhkaaga.

Boliiisku waa inuu mid kuwaa ka mid ah ku siiyaa. Haddii sarkaalka si kedis ah loogu yeedho, way kaa tegayaan iyagoon kaa buuxsan tafaaiisha, wayse kuu sheegayaan sidaad rasiidh ku heleyslid ka dib markay u dhmaato. Haddanad marka mid lagu siin siddex billood gudahood ayaad saldhiga boliiska ka dalban kataa.

Taasi waxay fududahay markaad haysatid agoonsiga sarkaalka, Hadaadan haysanin waxa tafaasiil ah aadse u baahantahay (tusaale inaad cabasho gudbisid) Habab taa loo maraa jira. La xidhiidh Y-STOP si ay kuu caawiyaan.

## SAJILIHID AM DUUBID (RECORDING)

Hadaad sidatid smart phone, si xishmad leh ugu sheeg sarkaalkad inaad la soo baxaysid si aad u sawirtid baadhidda (Jeebka oo gacanta la geliyo degniin la'aan waxa si khalad ah loo qaadan karaa cabsi – gelin). Shaqadooda ah iskaga gudbin markaad filimka qaadaysid. Waa gef (Meel-ka- Dhac) inaad isku – gudubtaa. Saaxiibkaa am qof socoto ah baad weydiisan – kartaa inay

sawir ka qaadaan dhacdada markhaati ahaan. Sawir – qaadidu waxay badbaadineysaa danaha dhinacyada. Waa laguu ogol – yahay sawir – qaadid, marar baanay-se saraakiishu arrintaa jeclaysan waxayna kuweydiisan karaan joji. Tilifoonkaaga way kaa qaadi karaan hadday ka shakiyaan in la soo xaday. Hadaad soo wareejisid fiidyoo nool (live streaming video) qoraalka hoose ayaa kugu xidhiidhinaya in kastoo lagaa qaado tilifoonkaaga. Sidoo kale waad duubi kartaa adiga oo isticmaalaya Y-STOP app si toos ahna  waad noogu soo diri kartaa fiidoyowga si aanu u fahano waxa dhacay.

## KALSOONI

Tani way fududahay haddad ogtaha halkaad arrinta ka taagantahay, hadaba aynu saxno xuquuq muran dhalin-karta:

- Ma aha inaad sheegtid magacaaga iyo cinwaan-kaaga.
- Waad dhiibi kartaa haddii sarkaalku kuu diiwaan – gelinayo gef aad hadda ama hore u gashay.

- Hadaadan hubin weydii **“sarkaalku, mawaxaad ii diiwaan – gelineysaa gef (Offence)”**.
- Haddada diido sheeegida magacaaga taa bedelkeed sarkaalku tilmaamaahag ayuu qorayaa.
- Sarlkaalku kuma waydiin karoo laxidhiidhka walidkaa, kugumana cabsiin-karo inuu guriga kuu geeyo.
- Bolisku **gacamaha kaama xidhi karo**, xoogna kuguma baadhi karo hadaadan jidh ahaan (Physically) iska caabin ama gacan-qaad ku kicin (ama u mooqan mid cabsi – gelinaya).
- **Fagaarayaash (goobaha dadwynaha) wax kaliya ee la baadh waa dharkaaga sare, jeebabkaaga iyo shandadaada**, wixii dheeraad ah akhri qaybta (baadhidda dhaka, gooninimada, dhar-ka dhid. (Clothing, privacy and strip search.)

# MARAG – KAC

Qaadhidda talaabooyinka kor ku xusan waxay boliska ku dhiirinayaan inuu si fiican kuula dhaqmo, haddanay sidaa yeelin waxaad haystaa marag – kac, markaa hubi inaad:

- Waydiisato rasiidh, meel fiicana dhigo

  Duubista baadhida oo dhan waxay ku khasbaysaa boliiska jawaabaha iyo sharaxaada ay ku siiyeen. Taasaana keenaysa inay sharciga raacaan.

- Filim ka qaad jooji – baadh

  Filim – qaadiddu waxay caainaysaa toosinta dhaganka boliska. Qofna ma jecla in laga duub isagoo si xun u dhaqmaya. la wadaag filimadaada Y-STOP si dadka kale u ogaadaan waxa meesha jira iyo siday ula tacaali lahaayeen.

- Soo Sheeq ama kacabo

  Ha ogalaanim hadduu boliisku si xun kuula dhaqmo, sannad gudihii ku samee cabasho boliis oo rasmi ah.

# XUQUUQDA DHEERAAD AH

**Baadhitaanada dharka, goonida (Keli ahaanta) iyo dhar-dhigidda.** Saarkaalku waxuu kaliya codsan karaa in qofku meel fagaara ah ku bixiyo jaakada, gloofiska – gacanta iyo shay kasta oo aqoonsigaaga qarinaya, gacmahay gelin karaan kabahaaga, sharabaad aaga, koofiyada hadday qabaan in wax ku hoos-jiraan. Waxay codsan karaan inaad jeebka xagiisa hoose kor soo marisid haddi kale gacmahooday ku taabanayaan walaxhaa.

Hadday ku weydiistan inaad bixisid qaybo kale oo dharkaaga ah wax loogu yidhaa ama **'Baadhid buuxda oo Dheeraada'** Tusaala, Bixinta garan – hoose ama shaadh qoor go'an. **baadhid dhar – dhigid**. Taa soo ay ku jurto dharkool lagaa wada-dhigo. **Baadhida buuxda ee dhar – dhigadda** waxa lagu samayn – karaa baabuur boliis godaashiisa, ama goob u habaysan arrintaa sida taandhada boliiska.

**Baadhitaanka dhar – dhigid** waa inay ka dhacdaa meel ka dheer araga dadweynaha, fuliyaana sarkaal kula jinisi ah kuna arki karayn sarkaal kaa jinsi duwan.

Sarkaalku waa inuu la yimaadda sabab keeneysa baadhidaa dheeraad ka ah, ma noqoneyso in layska yidhaahdo waxbaan weli lagaa helin. Wixii diin la xidhiidha qaadidoodu waa in loo tixigeliyaa sida baadhid buuxda oo dheeri ah.

Hadaadan ku calool samayn, weydiisu meel asturan oo gaar ah. Hadday kaa yeeli waayaan, ka codso inay kuu geliyaan diiwaankood. Looguma talo-gelin in jooji-Baadh noqoto arrin sharaf dhaca.

Haddii lagugu qaaday baadhid dhar – dhigid, noo sheeg waxaanu hubinaynaa inay jiraan sababo loo qaadi karo talaabo cabasho ama sharci.

## Waa maxay shakiga sababaysan (la qaadan karo)?

Arrintani sharciga kuma qeexna, tusaalayaal lagu sin karo wax ka mida:

- Shakiga inaa ku lug leedahay gef-eedaysan.
- Buxinta tilmaama qof dembiile ah.(waad waydin kart waxa ay yihiin tilmaamuhu)in laga soo dayn-karo idaacadda saldhiga si aad u aragtid inay run tahay.

Kuwaasi **waa sababaha sharci darro** ah in booliisk ku siiyo:

- Waxay ogyihiin inaad leedahay war bixin dambiile ama hore laguu qabtay adoo sita walaxyo sharci darro ah.
- Waa goob dembiyadu sareeyaan.
- Waxay u malaynayaa inaad u muxuuqatid qof laga shakiyo (in kastoone qumaati u sharixi karin waxay ka shakisanyihin).

Way adagtahay in shakiga sabahaysan la caddeyo iyo inaan la cadayn-karin, sida ugu fiicani waa adiga oo qaata rasiidh una soo sheega Y-STOP. Waanu ku caawinaynaa kaalana shaqaynayaa hadday jirto talaabo dheeri oo laqaadaa.

## Haddii lagu qabto

Waxa ugu muuhiim ahi waa inaad booliiska hadal u furin ilaa uu goobta joogo lataliye – sharci, kaasoo noqon kara garyaqaanka – shaqada markaa haya ama wakiil gaar ah ood adigu codsatid.

Ma jirto waxa la yidhaahdo la saaxiib-sheekaysi booliiska. Waxa kastood ku hadasho maxkamadaa loo adeegsanayaa. Haday didaadu tahay 18 ama ka yar, **qof wayni waa inuu goob – joog ahaadaa**. Kaasi wuxuu noqon karaa qof qawyskaaga ka mida; qof kaa mas'uul ah (guardian) ama u adeega-bulshada

**Dhakhso noola soo xidhiidh hadii:**

- Awood dheeraad ah laguu adeegsaday
- Hadaad ka yartahay 18 oo lagu dhar-dhigid baadhay

**contact@y-stop.org**

**S**TAY CALM
**E**YE CONTACT
**A**SK QUESTIONS
**R**ECEIPT & RECORD
**C**ONFIDENCE
**H**OLD TO ACCOUNT

© Y-Stop 2015